© Minnesota Judicial Branch

BUUGYAREHA MACLUUMAADKA DADWEYNAHA
EE XARUNTA ADIGU NAFTAADA IS-CAAWI

# Waxa uu Filanayo Dacwoodaha ama Dacweysanaha Maxkamadeynta Qoyska ama Dacwad-dhageysiga Diiwaangelinta Caddeymaha

Buugyarehaan waxaa loogu talagalay in uu noqdo tasiilaad ah wargelin dhab ah oo lagu fahmo habraaca Maxkamadda Qoyska. Qoraalka buugyarehan ma aha talo sharci ah oo waa in aan laga dhigan tixraac loo adeegsan karo sharci dowladeed. Buugyarehan ma geli karo booskii Xeerarka Minnesota ee Dacwadaha Madaniga ah, Xeerarka Dhaqangelinta Sharciga Guud ee Minnesota, Xeerarka Caddeymaha ee Minnesota, ama dhaqangelinta shakhsi ahaaneed ee saraakiisha garsoorka ee Maxkamadda. Dhammaan dhinacyada isticmaalaya buugyarehan waxa ay masuul ka yihiin in ay u hoggaansamaan dhammaan xeerarka maxkamadadaha. Haddii ay jiraan wax khilaaf ah oo u dhexeeya buugyareha iyo xeerarka lagu dabbakhayo maxkamadda, xeerarka maxkamadda ayaa la raacayaa.

# Tusamada Qoraalka

Hordhac ... 3
Markaad la xiriireyso Shaqaalaha iyo Garsoorka Maxkamadda ... 3
Noocyada Kiisaska Maxkamadda Qoyska ... 4
Xalraadinta ... 5
Doorka Garsoorka Maxkamadda (Xaakim ama Caawiye) ... 6
Xeerarka Caddeynta iyo Habraaca Xeerarka Madaniga ... 7
Markhaatiyada ... 8
Waraaqda u-yeerista iyo Kharashka Markhaatiga ... 9
Diyaarinta Caddeymaha ... 10
Calaamadeynta Bandhigyada ... 11
Liiska Markhaatiyada iyo Bandhigyada ... 11
Qodobbada Maxkamadeynta ... 12
Maxkamdeynta ... 13
Habdhaqanka maxkamada, oo ay ku jirto Dacwad-dhageysiga Fogaan-aragga ... 13
Hordhaca Furitaanka ... 14
Arrinta-ugu-Weyn Codsadaha iyo Jawaabaha ... 14
Weydiinta Su'aalaha ... 15
Su'aalaha Dhinaca Kale ... 15
Su'aalo-weydiin Kale (ama Rogaalcelis) ... 16
Markaad ka Maragfureyso Kiiskaad Wadato ... 16
Soo-bandhigidda Caddeynta ... 16
Diidmo ... 17
Doodaha Kama-dambeysta (oo sidoo kale la yiraahdo Hadalka Gabagabada ama Doodda Gabagabada) ... 17
Culeyska Caddeynta ... 18
Go'aanka ... 18

## Hordhac

Buugyarehan waxaa loogu talagalay dadka matalaysa naftooda ee isu diyaarinaya maxkamadda ama dacwad-dhageysiga diiwaangelinta caddeymaha. **Maxkamdeyntu waa wax adag, laakiin buugyarehaan waxa loogu talagalay in wax lagu sii fahmo.**

Dacwadaha Maxkamadda Qoyska iyo dacwad-dhegaysiyada caddeynta ah caadi ahaan **kuma** lug laha xeerbeegti. Taas baddalkeeda, garsoorka ayaa go'aamiya xaqiiqooyinka la caddeeyey oo amar ka soo gaara. Buugyarehan kama hadlayo arrimaha la xiriira xeerbeegtida.

Waxa kale oo kuu weheliya buugyarehan, waa wax lagugu dhiirrigelinayo oo ah:

- **Daawasho ah maxkamadeynta.** Inta badan maxkamadeynta waxaa imaan kara dadweynaha.
- **Talo u raadso qareen.** Waxaad macluumaad ka heli kartaa xarumaha talabixinta sharciga ee bilaashka ah, inaad qabsato qareen, iyo fursado kale oo ah talabixin sharciyeed barta aan ku hayno ee Mowduucan u Hel Caawimaad Qareen (mncourts.gov/Help-Topics/Find-a-Lawyer.aspx).
- **Booqo barta maktabadda sharciga** (mncourts.gov/Help-Topics/Law-Libraries)**.**
- **La xiriir Xarunta Adigu Nataadi Is-caawi** (mncourts.gov/Help-Topics/Self-Help-Centers.aspx)**.**

## Markaad la xiriireyso Shaqaalaha iyo Garsoorka Maxkamadda

Waxaa muhiim ah in aad sida ku habboon ula xiriirto shaqaalaha iyo garsoorka maxkamadda. Shaqaalaha maxkamadda waxay diyaar u yihiin in ay ku caawiyaan intii karaankooda ah. Waxa uu waajibkoodu yahay waa in ay ku siiyaan macluumaad, kuma siin karaan talo sharci ah. Macluumaad gaar ah oo ku saabsan waxa ay shaqaalaha maxkamadda sameyn karaan iyo waxa aysan sameyn karin, booqo barta Caawimaadda Mowduuca Waxay Shaqaalaha Maxkamaddu Sameyn Karaan iyo Waxaysan Sameyn Karin (mncourts.gov/Help-Topics/What-Staff-Can-Do.aspx).

"*Gargoynta halka dhinac*" waa eray Laatiin ah oo macnihiisu yahay "hal dhinac oo keliya; ama loo go'aamiyey hal codsade". Gargoynta halka dhinac waa wax dhaca marka hal dhinac oo ah kiiska dacwada, ama qof ay is hayaan dad kale, markuu si toos ah ula soo hadlo ama dacwad ugu soo qorto garsoorka arrimo ku saabsan kiiska iyadoo aysan ogeyn dhinacyada kale ee ay is hayaan. Garsoorku ma tixgelin karaan sameynta gargoynta halka dhinac markay go'aaminayaan kiis dacwadeed ilaa ay sharci ahaan si cad oggolaansho ugu haystaan. Arrintaas waxay garsoorka ku caawineysaa in ay

kiisaska u go'aamiyaan si caddaalad ah maadaama ay go'aamadooda ku saleynayaan keliya caddeynta iyo doodaha loogu soo bandhigo maxkamadda iyo sharciga lagu dabakhi karo. Xeerka ayaa xaqiijinayaa in uu habka maxkamadda yahay mid caddaalad ah iyo in ay dhammaan dhinacyadu haystaan macluumaad la mid ah sida kan garsoorka kiiska go'aamin doona.

Fadlan ixtiraam u muuji markaad la xiriireyso shaqaalaha iyo garsoorka maxkamadda.

## Noocyada Kiisaska Maxkamadda Qoyska

Inkasta oo aysan run ahaantii jirin wax la yiraahdo kiis "caadi ah", qaar badan oo ka mid ah maxkamadda qoyska waxay maraan habraacyada hoos ku qoran. Buugyarehan wuxuu faahfaahinayaa oo keliya wejiga Maxkamadeynta Ka-hor iyo Maxkamadeynta. Dacwad-dhagaysiyo kale oo badan ayaa laga yaabaa in ay dhacaan ka hor maxkamadeynta ama intii ay ka dhici lahayd maxkamadeyn. Maxkamadeyntu lama mid aha dacwad-dhageysiga mooshin ama codsi. Buugyarehaan **ma** sharxayo wax dhacaya oo ah mooshinnada maxkamadda. Si taxaddar leh u akhriso dhammaan amar kasta iyo waraaqaha maxkamadda si aad u fahamto waxa laga filanayo dacwad-dhageysi kasta. Haddii aad su'aalo qabto, la xiriir Xarunta Adigu Naftaada Is-Caawi (mncourts.gov/Help-Topics/Self-Help-Centers.aspx).

- **Wajiga hore:** Marka lagu jiro wejigan, codsaduhu wuxuu waraaqaha u dirayaa (badanaa, "U-yeerista" iyo "Dacwada") si uu u bilowdo kiiska maxkamadda, oo dhinaca kale (ama "dacweysanaha") ayaa ka jawaabaya ("Jawaab iyo Dacwad-celis") ka dhan ah dacwoodaha. Codsiga wuxuu sheegayaa waxa uu dacwooduhu ka codsanayo maxkamadda in ay go'aamiso. Dacwooduhu wuxuu adeegsadaa Jawaab iyo Dacwad-celis ka dhan ah codsiga dacwoodaha oo waxa uu ku sheegayaa waxa uu ka codsanayo maxkamadda in ay go'aamiso. Marka kiiska maxkamadda qoyska la xareysto, caadi ahaan waxaa la sameynayaa Initial Case Management Conference (Wejiga Hore ee Kulanka Maareynta Kiiska) ("ICMC"). Kulankan waa mid si aan rasmi ahayn loola kulmayo garsoorka waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo dhinacyadu in ay kiiska xal u helaan. Inta badan, dhinacyada waxaa loo soo bandhigayaa inay ka qeybqaataan hab ah xalgaaris oo la yiraahdo Qiimeynta Dhexdhexaadinta Hore (mncourts.gov/Help-Topics/ENE-ECM.aspx).

- **Wejiga Daahfurka/Qiimeynta:** Inta lagu jiro wejigan, dhinacyadu waxa ay is weydaarsanayaan macluumaad oo waxaa laga yaabaa in ay ka qaybgalaan noocyo kala duwan oo ah qiimeyn. Is weydaarsiga macluumaadka ("daahfurka") waxaa loo sameyn karaa

si aan rasmi ahayn (tusaale ahaan, codsiyo ah boostada intarneta) ama si rasmi ah iyada oo loo marayo su'aalo-weydiin afka ah, codsiyada waraaqaha, maragfurka markhaatigaa, iyo codsi ah in loo oggolaado. Habraacyada kale, sida qiimeynta haynta, qiimeynta maaliyadeed, qiimeynta maandooriyaha, ama qiimeynta cilminafsiga ayaa la amri karaa si loogu caawiyo uruurinta macluumaadka.

- **Wejiga Maxkamadeynta Ka-hor:** Wejigan marka lagu jiro, dhinacyada dacwada ayaa isu diyaariya maxkamadeynta. Waxay sida ay u kala horreeyaan u diyaarsanayaan caddeynmahooda iyo markhaatiyadooda, oo waxaa laga yaabaa in ay codsiyo u gudbistaan maxkamadda si loo yareeyo arrimaha dacwada. Markan ayey sidoo kale dhinacyada is haya isku dayi karaan in ay kiiskooda xal u helaan. Xaaladaha qaarkood, maxkamadda ay ku amri karta in ay dhinacyadu isku dayaan Alternative Dispute Resolution (Baddiilka Go'aangaarista Khilaafka ama ADR). Dedaallada xalraadinta waxay dhici karaan mar kasta inta kiisku socdo. Soo akhriso [Mowduuca Caawimaadda Baddiilka Go'aangaarista Khilaafka](mncourts.gov/Help-Topics/AlternativeDisputeResolution.aspx) (mncourts.gov/Help-Topics/AlternativeDisputeResolution.aspx) si aad u hesho faahfaahin.
- **Wejiga Maxkamadeynta:** Inta wejigan lagu jiro, kiiska waxaa dhageysanaya garsoorka. Waxay qaadan kartaa dhowr saac ama maalmo badan, oo waxay ku xiran tahay sida kiisku u adag yahay. Dhinacyada is haya waxay soo bandhigayaan cadeymahooda, sida markhaatiyada iyo waxyaabaha caddeynta ah, oo garsoorka ayaa go'aamiya kiiska oo amar ka soo saaraya.
- **Wejiga maxkamadeynta ka-dib:** Inta lagu jiro marxaladan, mid ama labada dhinacba ayaa rafcaan ka qaadan kara go'aanka maxkamadeynta. Arrimo kale ee go'aanka ka dambeeya ayaa laga yaabaa in ay soo baxaan maxkamadda ka dib, sida codsiyada beddelka masruufka ilmaha ama jadwalka wakhtiga waalidnimada.

## Xalraadinta

Kiisas badan ayaa xal ku heshiiya ka hor maalinta maxkamadeynta ama xataa maalinta maxkamadeynta. "Xalka" waxa loola jeedaa inay dhinacyada is haya heshiis wada galaan oo uu garsoorkuna ka oggolaado heshiiskooda. Waxa laga yaabaa in marar badan la weydiiyo, dhinacyada kala duwan ee kiiska, inay xal u raadsadaan khilaafkooda. Garsoorka ayaa shuruud ka dhigi kara in ay dhinacya oo dhan kulmaan ama ay ka qeybgalaan Baddiilka Go'aangaarista Khilaafaadka

(mncourts.gov/Help-Topics/AlternativeDisputeResolution.aspx) sida dhexdhexaadin, in xal lagu heshiiyo ka hor intaysan maxkamadeyntu bilaaban.

Waxa laga yaabaa in uu garsoorku qabto "Kulanka Hordhaca Maxkamadeynta" si ay dhinacyadu uga wada hadlaan maxkamadeynta iyo caddeynta iyo si loo dedejiyo maxkamadeynta dhabta ah. Waxaa khasab ah in laga soo qeybgalo Kulanka Hordhaca Maxkamadeynta iyadoo la isu diyaarinayo si kiiska loogu helo xal iyo si loo tixgeliyo xalgaarista laga heli karo dhinaca kale. Mar kasta oo aad imaaneyso dacwad-dhegaysi, sida maxkamadeynta, waxaad filan kartaa in garsoorku ku weydiiyo adiga iyo dhinaca kale waxa aad isku daydeen oo kiiska xal u noqon kara.

Shaqada hordhaca maxkamdeynta waxaa qeyb ka ah, in aad adiga iyo dhinaca kale sameysaan liis ah xaqiiqooyinka aad ku heshiiseen. Waxaas waxaa loo tixgelinayaa "Xaqiiqooyinka Heshiiska." Marka lagu heshiiyo waxyaabaha runta ah waxay sidaas ku yaraanaya wakhtiga maxkamdeynta oo waxaa la xadeyn karaa tirada markhaatiyada loo baahan doono.

Heshiisku wuxuu u oggolaanayaa in ay dhinacyada is haya gaaraan xal ku habboon qof kasta oo waxaa u suurtoobeysa in ay dhinacyadu "sii ogaadaan" natiijada kiiskooda. Aadista maxkamadeynta macnaheedu waa in ay Garsoorka ama xeerbeegtidu soo go'aaminayaan natiijada kiiska intii ay dhinacyada is haya heshiin lahaayeen. Haddii aad maalinta maxkamadeynta ka hor adiga iyo dhinacyada aad is haysaan heshiis gaartaan, si degdeg ah u soo garaac taleefanka xoghaynta garsoorka.

Akhriso Mowduuca Caawimaadda Heshiiska Ka-baxsan Maxkamadda (mncourts.gov/Help-Topics/Settle-Out-of- Court.aspx) oo macluumaad dheeraad ah kuu ah.

## Doorka Garsoorka Maxkamadda (Xaakim ama Caawiye)

Garsoorka waajibka saaran waa kormeerka maxkamadeynta ama caddeynta, iyo hubinta dhinacyada is haya in la dhegeysto sida ay ugu oggol yihiin xeerarka habraaca iyo caddeynta. Garsoorka Maxkamadeynta ayaa go'aaminaya haddii uu dacwooduhu si cad u soo bandhigo kiiskiisa, iyo waxay abaalmarinta ama natiijadu noqoneyso. Garsoorka iyo shaqaalaha maxkamadda ayaa kuu sheegi kara talooyin guud, laakiin haddii aad adigu naftaada mataleyso, waa inaad go'aansato arrimaha Dacwada iyo Jawaabaha iyo Dacwadceliska, mowduucyada aad ka hadleyso, caddeymaha muhiimka kuu ah, iyo su'aalaha aad weydiineyso markhaatiyada.

Qofka garsoorka ah waa in uu ahaado dhexdhexaad. Si kale haddii loo dhigo, qofka ah garsoorka waa in uu noqdo mid caddaalad u ah labada dhinac. Waxaa laga yaabaa inay garsoorku su'aal weydiiyaan markhaatiga si ay wax u kala caddeeyaan, laakiin lama wareegayaan oo dadka ma

weydiin doonaan su'aalaha muhiimka ah oo dhan. Adiga ayaa wata kiiska, oo adiga ayaa go'aaminaya waxaad rabto in garsoorku maqlo oo arko.

## Xeerarka Caddeynta iyo Habraaca Xeerarka Madaniga

Garsoorka ayaa sameyn doona maxkamadeynta, Xeerarka MN ee Dacwada Madaniga (revisor.mn.gov/court_rules/cp/), Xeerarka MN ee Caddeynta (revisor.mn.gov/court_rules/rule/ev-toh/), iyo Xeerarka Adeegsiga Guud ee MN (revisor.mn.gov/court_rules/gp). Maktabadasha sharciga (mncourts.gov/Help-Topics/Law-Libraries.aspx) sidoo kale haya buugaag aad u sharaxaya xeerarka oo ay ku jiraan qaybo ka mid ah kiisaska maxkamadaha lagu fasiray xeerarka (sharciga kiiska).

Qofna ma saadaalin karo xeerarka saxda ah ee la adeegsanayo, laakiin qaar ka mid ah xeerarka ee inta badan lagu dhaqmo ayaa qeybaha hoose looga hadlayaa ee buuggan qeybtiisa dambe. Garsoorka waxaa looga baahan yahay inuu raaco xeerarkaas, oo waa sida adiga iyo dadka kale ee ka qeybgalaya maxkamadeynta.

Fikradda aasaasiga ah ee Xeerarka Caddeynta ee MN waa in la hubiyo in ay caddeyntu tahay mid la aamini karo. Waxay qof kasta ku noqon doontaa caddaalad darro haddii garsoorku ku tiirsanaado caddeymo ah su'aalo la is weydiin karo marka kiiska la go'aaminayo. Maxkamadeynta inta badan, maragfurka markhaatiyada ayaa loo adeegsanayaa caddeyn ahaan. Markhaatigu waa uu dhaaranayaa oo wuxuu ballanqaadayaa in uu runta sheego, oo markhaatigu waa uu joogaa, si ay dhinaca kale u weydiin karaan su'aalo ("weydiimo toos ah"). Xeerka caddeynta ee wixii ah "kutiri-kuteen" ama hadalka ka baxsan maxkamadda waa inuu qofka maragfur ahaan ula yimaado maxkamadda. Guud ahaan, maragfur kuuma noqoneyso waxa uu qof kale kuu soo sheegay. Waxa jira waxyaabo ka reebban xeerkan oo muhiim ah oo lagu qeexay Xeerarka Caddeynta ee MN (eeg Qodobka 8aad – ee kutiri-kuteenta).

Xeerka 901 ee Xeerarka caddeynta ee MN wuxuu wax ka qabtaa waxa loo baahan yahay ee ah waraaqo, sawir, taleefan iyo diiwaangelin kambuyuutar ah, ama si loogu kalsoonaan karo wax la taaban karo oo loo oggolaanayo caddeyn ahaan. Caadi ahaan, si cadeymaha noocaan ah loo ogolaado (macnaha oggolaanshaha waa in ay tixgeliso maxkamadda), waa in aad hesho markhaati si aad u sharraxdo sida waraaqda ama macluumaadka loo sameeyey iyo in aad ka markhaati furto in uu macluumaadka dhabta ah yahay wax u muuqda (in ay dhab yihiin). Waa in aad markhaatiga weydiiso su'aalo si aad uga "dhigato aasaas." Taasi macnaheedu waa in ay su'aalahaagu u oggolaadaan markhaatiga inuu ka hadlo waxa shaygu yahay, cidda abuurtay, goorta, meesha, iyo

sababta loo sameeyey. Waraaqaha qaarkood ayaa la oggolaan karaa caddeyn la'aan, sida koobbi laga soo xaqiijiyey diiwaanka dadweynaha (eeg Xeerka 902 ee Xeerarka Caddeymaha ee MN). Haddii garsoorku wax u oggolaado caddeyn ahaan, waxay noqonaysaa qeyb ka mid ah maxkamadeynta.

Fikrad kale oo muhiim ah oo ku saabsan Xeerarka Caddeymaha ee MN waa sida u khuseeyaan dacwada (eeg Qodobka 4 – Khuseynta). Haddii aysan caddeyntu khuseyn kiiska, garsoorku caadi ahaan ma oggolaan doono. Caddeyntu waxay garsoorka ku caawineysaa go'aaminta haddii sheekadaadu run tahay. Haddii uu markhaati kuu marag furayo oo aad maqasho, "Diidmo ayaan ka qabaa garsooraha sharafta leh, maragfurkaasi waa mid aan kiiskan khuseyn," waa in aad sharxi karto sababta uu markhaatigu u sheegayo in ay muhiim u tahay oo caawineyso garsoorka go'aaminaya kiiska. Haddii garsoorku go'aansado in su'aalaha la is weydiinayo ay ku caawinayaan go'aangaarista, waxaad ka maqleysaa, "Diidmada lagaama yeelayo. Markhaatiga, waxaad sii wadi kartaa jawaabtaada su'aasha." Haddii garsoorku "ayido" diidmada, markhaatigu kama jawaabi karo su'aashaas.

Xataa caddeynta kiiska la xiriirta ayaa laga yaabaa in la diido xaaladaha qaarkood. Garsoorku ma oggolaanayo caddeyn haddii ay soo noqnoqoto oo dhib ku tahay maxkamadeynta. Tusaale ahaan, garsoorku wuxuu oggolaan karaa 1 ama 2 sawir oo muujinaya xaalad uu qol guri ku dhex yaalla ku sugan yahay, laakiin ma oggolaanayo 20 sawir oo muujinaya wax isku mid ah.

## Markhaatiyada

Adiga ayaa masuul ka ah in aad hubsato in ay markhaatiyadu yimaadaan maxkamadda. Kol hore qorsheyso. Garsoorku dib uma dhigayo maxkamadeynta si aad u soo diyaarsato markhaatiyaal aad kol hore la xiriiri kartay. Waa in aad sida ugu dhakhso badan ula xiriirto markhaatiyadaada taariikhda laguu qabto ballanta maxkamadeynta.

Markhaatiyadu waa inay diyaar kuu ahaadaan maalinta maxkamadeynta. Markhaatiyada qaarkood waxaa laga yaabaa in laga diido maragfurkooda. Waa inay soo bandhigi karaan caddeymo la aqbali karo, taas macnaheedu waa in markhaatigu aqoonu leeyahay oo uu joogay waxa uu ka maragfurayo. Tusaale ahaan:

1. Markhaatigaaga, Mary, ayaa ka marag kacaysa in uu waalidka kale si joogto ah uga tago ilma yar keligiis oo aad wada dhasheen.
2. Diidmo ayaa laga soo gudbiyey iyo in aysan shakhsi ahaan aqoon ugu lahayn.
3. Waxaad markaas waydiineysaa Mary siday ku ogaatay in waalidkaasi ka tago ilmaha yar keligiis.

- Haddii ay Mary tiraahdo wax la mid ah, "Saaxiibkay ayaa joogay oo sidaas iigu sheegay," hadalka Mary looma qaadanayo caddeyn sababtoo ah iyadu ma aysan ahayn goobjoog.
- Haddii ay Mary sheegto inay aragtay waalidkaas oo ka tagaya ilmaha yar keligiis, waxaa la oran karaa waa goobjoog.

Xataa haddii maragfurku yahay mid la aqbali karo, oo ay markhaatiyo badan ku soo celceliyaan sheeko isku mid ah, garsoorka ayaa diidi kara maragfurka dadkaas oo dhan wakhti-yaraan awgeed.

Mararka qaarkood dhinac ayaa u yeeran kara "markhaati khabiir" ah oo kiiska ka markhaati fura. Khabiirku waa qof leh aqoon, farsamo, ama aqoon kale oo gaar ah oo ku saabsan mowduuc gaar ah (tusaale, xisaabiye, qiimeeye, xirfadle cilminafsi, Waalid sharcigu magacaabay, iwm.). Khubaradu waxay inta badan ka marag furaan waa in ay dhiibtaan fikradahooda xirfadeed xaqiiqada kiiska, sida qiimaha hantida ama talabixin gaar ah oo ku saabsan haynta ilmaha ama wakhtiga waalidnimada. Xeerka 702 ee Xeerarka caddeymaha MN waxaa shuruud u ah in la iska hubsado markhaatifurka khabiirka. Si arrintaas loo sameeyo, waa in aad "runta ka sheegto" shahaadooyinka khabiirka ee mowduuca adiga oo qofka weydiinaya su'aalo ku saabsan tacliinta iyo khibradda xirfadeed. Sida laga rabo caddeymaha oo dhan, markhaatifurka khabiirka waxa uu sidoo kale hoos imaan doonaa xeerka kutiri-kuteenta iyo Xeerarka kale ee caddeymaha ee MN.

**Waraaqda u-yeerista iyo Kharashka Markhaatiga**

Sida keliya ee aad isku dayi karto waa dammaanadqaad ah in markhaati maxkamadda imaanayo si uu u marag furo ama maxkamadda u keeno waraaqo ayaa loo isticmaala u-yeerista. U-yeerista maxkamadda waa amar maxkamadeed oo qof loogu sheegaya in uu yimaado maxkamadda iyo/ama soo keeno waraaqo ama feylal. Haddii aad u baahan tahay inaad u yeerato markhaati, soo akhriso Xeerka 45 ee Xeerarka Habraaca Madaniga ee MN. Haddii uu markhaati kaa yeelo in uu yimaado maxkamadda, uma baahnid amarka maxkamadda. Haddii aad u baahan tahay in aad u yeerato markhaati, u soo codso sida ugu dhakhsaha badan.

Si aad u hesho u-yeerista maxkamadeed, waa in aad ka codsato maamulka maxkamadda ee degmada kiiskaaga laga soo gudbiyey adigoo bixinaya kharashka. Maamulka maxkamadda ayaa diyaarin doona waraaqda u-yeerista. Marka xigta, waa in aad diyaarsato qof kale (oo aan ahayn adiga) oo gaaray ama ka weyn 18 sano inuu waraaqda u-yeerista u geeyo markhaatiga, oo waa inay la socoto kharashka markhaatiga (oo adiga ayaa bixinaya kharashka markhaatiga).

Sida lagu sharxay foomka u-yeerista, haddii aad u yeerato markhaati, waa in aad

markhaatiga siiso $20 maalintii, iyo lacagta maaylka socodka baabuurka, haddii lagaa rabo. Kharashka maaylka baabuurka sharciga ayaa dejiyey oo lagu qoray sharciga Minn. Stat. § 357.22 (revisor.mn.gov/statutes/cite/357.22). Markhaatiyada qaarkood marka loo diro amarka u-yeerista maxkamadeed waxay sidoo kale xaq u yeelan karaan kharash ku habboon wakhtigooda, marka lagu daro maaylka baabuurka iyo $20 oo ah lacagta markhaatiga. Soo akhriso Mowduuca Caawinta Waraaqda U-yeerista (mncourts.gov/Help-Topics/Subpoenas.aspx) iyo Xeerka 45 ee Xeerarka Habraaca Madaniga ee MN (revisor.mn.gov/court_rules/cp/id/45/) si aad macluumaad uga hesho u-yeerista.

Haddii aad haysato waraaq ah amar lagaaga dhaafayo lacagta xareysashada maxkamadda (ee la yiraahdo Ka-dhaafidda Lacagta ama In Forma Pauperis), marka aadan awoodin in aad iska bixiso lacagta markhaatiga, waa in aad maxkamadda ka codsato in ay kaa bixiso lacagta. Si aad u codsato, soo buuxi Caddeynta Dheeraadka ee Lagaaga Dhaafayo Lacagta In Forma Pauperis oo waa in aad u gudbisato maamulka maxkamadda. Garsoorka ayaa go'aamin doona cidda bixineysa lacagta markhaatiga - adiga ama Maxkamadda. Akhriso Mowduuca Caawimaadda Ka-Dhaafista Lacagta (mncourts.gov/Help-Topics/Fee-Waiver-IFP.aspx) oo macluumaad dheeraad ah kuu ah.

Lacagta markhaatiga iyo maaylka gaariga waxay khuseeyaan oo keliya markhaatiyada loo yeero. Si fudud haddii loo dhigo:

- UGU-YEERISTA MAXKAMADDA: WAA in aad bixiso lacagta iyo maaylka baabuurka markhaatiga.
- MARKAADAN CIDNA U-YEERAN: MA bixineysid lacagta iyo maaylka baabuurka markhaatiga.

## Diyaarinta Caddeymaha

Caddeynta waxaa ka mid ah maragfurka markhaatigaaga, maragfurkaaga, waraaqaha, sawirrada, ama waxyaabo kale. Waraaqaha, sawirrada iyo walxaha kale waxaa la yiraahdaa "bandhigyo." Guud ahaan, caddeynta, sida bandhigyada, waa in la soo bandhigo maalinta maxkamadeynta. Caddeymaha lama soo gudbin karo maxkamadeynta ka dib (marka laga reebo amarka garsoorka xaaladaha aan qaarkood caadiga ahayn). Garsoorku waxay inta badan u diraan dhinacyada "Amarka Jadwalka" oo ay shuruud ku tahay in ay taariikh cayiman iska weydaarsadaan "Liiska Bandhigyada" iyo "Liiska Markhaatiyaasha". Garsoorku waxa kale oo laga yaabaa in ay u baahdaan in ay dhinacyadu bandhigyadooda is tusaan ka hor maalinta maxkamadeynta. Markaas ayey labada dhinac ogaanayaan in ay si fiican ugu diyaar garoobeen maxkamadeynta.

Garsoorku ma baari karo mana uruurin karo caddeymadaha. Adiga ayaa masuul ka ah inaad haysato caddeymaha si aad maxkamadda ugu soo bandhigto.

Guud ahaan laguuma oggolaan doono inaad isticmaasho taleefan si aad ugu soo bandhigto caddeynta (tusaale ahaan, in aad garsoorka tusto farriimo qoran ama sawirro taleefan ku jira). Waa in aad wakhti hore u diyaargarowdo in aad caddeyn kasta sida ugu fiican u soo bandhigto.

Ka hor intaysan bilaabmin maxkamadeynta, garsoorka ayaa idin ku weydiin karaa in aad adiga iyo dhinacyada kale "yeesheen" oggolaansho ah waraaqo ama waxyaabo kale. Yeelidda oggolaanshaha waxay ka dhigan tahay in ay laba dhinacba ay ku heshiiyeen in waraaqo ama waxyaabo kale maxkamadda loogu tixgelinayo caddeyn ahaan. Waxaa caadi ah in la yeelo oggolaanshaha caddeynta haddii uusan ka taagneyn wax khilaaf ah ama ay sax yihiin waraaqaha ama waxyaabaha kale. Tusaale ahaan, labada dhinac waxay yeeli karaan oggolaanshaha Waraaqaha Canshuurceliska Dakhliga ee Federaalka 2019. In kasta oo koobbiyada canshuurta loo tixgelinayo caddeyn ahaan, haddana waa in garsoorka loo sharxo muhiimadda uu macluumaadkaasi leeyahay. Sidee bay xog ku jirta canshuurcelinta u caawineysaa waxa aad sheeganeyso? Sidoo kale, dhinaca kale ayaa isticmaali kara canshuurcelinta si ay ugu sharxaan wixii dhacay.

Akhriso Mowduuca Caawimaadda Bandhigyada (www.mncourts.gov/MNDES) si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan bandhigyada caddeynta, sida macluumaadka MNDES, MN Digital Exhibit System (Habka Bandhigyada Intarnetka) ee laga isticmaalo Waaxda Garsoorka MN.

**Calaamadeynta Bandhigyada**

Wakhtiga maxkamadeynta, dhinac kasta waa in ay bandhigyadooda "calaamadiyaan." Bandhigyada waxaa lagu calaamadeeyaa in lagu dhejiyo istiikar ama warqad dhejis ah ama wax kale oo leh lambarro taxane ah (tusaale, "Bandhigga 1," "Bandhigga 2," "Bandhigga 3," iwm.). Mararka qaarkood, bandhigyada waa in la sii calaamadiyo maalinta maxkamadeynta ka hor. Garsoorka qaar ayaa doorbida in ay karraaniga ama weriyaha maxkamadda calaamadiyaan bandhigga marka loo soo bandhigayo maxkamadda. Mararka qaarkood garsoorka ama karraaniga ayaa dhinacyada siinaya lambarrada bandhigyada. Eeg Amarka Jadwalka ama la xiriir karraaniga si aad u aragto habka ay garsoorku doorbidayaan.

**Liiska Markhaatiyada iyo Bandhigyada**

Xataa haddii aysan garsoorku amrin in bandhigyada la beddelo maxkamadda ka hor, waxaa kuu fiican in la sameeyo Liiska Bandhigyada iyo Markhaatiyada. Liiska Bandhigyada waa liiska

waraaqaha iyo wax kasta oo aad qorsheyneyso in aad ku soo bandhigto caddeynta maxkamadeynta. Liiska Markhaatiga waa liiska markhaatiyada aad qorsheysato maragfurkooda maxkamadeynta. Waxaad Liiska foomamka Markhaatiyada ka heli kartaa www.mncourts.gov/forms qeybta Madaniga.

Qorista liiska waxa ay kaa caawin doontaa in aad sii habeysato kiiskaaga maxkamadeynta ka hor, oo wakhtiga maxkamadeynta waxaad hubin kartaa liiska si aadan waxba u hilmaamin. Sida kor ku qoran, garsoorku waxa ay kaaga baahan karaan in aad dhinaca kale u gudbiso Bandhigyada iyo/ama Liiska Markhaatiyada ka hor maxkamadeynta.

Maxkamdeynta caadi ahaan marka la sameyanyo waa in la soo xaadiro. Xusuusnow haddii ay maxkamadeyntu tahay fogaan-arag, waxaa jira shuruudo kale oo wax loogu soo bandhigi karo. Maalinta la soo xaadiro oo ay maxkamdeyntu dhacayso (ama ka hor, haddii sidaas lagugu amro), waa in aad haysato waraaqaha iyo wax kasta oo asal ah, iyo ugu yaraan 3 koobbi oo waraaqo ah. Hal koobbi waa kan garsoorka, hal koobbi adigu hayso, hal koobbi waa kan dhinaca kale (waa in aad koobbiyo badan u diyariso haddii ay dacwada ku jiraan dhinacyo kale). Inta ay maxkamaddu socoto, markhaatigu wuxuu eegi doonaa waraaqaha asalka ah, oo kuwaas ayaa loo soo bandhigi doonaa caddeyn ahaan, laakiin waa in aad koobbiyo kale u diyaariso dhinacyada kale si ay u arkaan inta ay socoto maragfurka markhaatiga. Haddii garsoorku waraaqaha u oggolaado (u aqbalo) caddeyn ahaan, waxay noqoneysaa qeyb ka mid ah diiwaanka maxkamadeynta.

**Qodobbada Maxkamadeynta**

Qareen kasta ayaa sii qorta "Qodobbada Maxkamadeynta", balse adiguna waad sii qoran kartaa. Waa wax kugu caawinaya in aad sii kala habeysato qeybaha kiiskaaga (Hordhaca Furitaanka, Liiska Markhaatiyada, Liiska Bandhigyada, koobiyada bandhigyada, su'aalaha aad qorsheysato in aad weydiiso markhaati kasta, doodda kama-dambeysta ah, iwm.). Ka hor inta aadan qoran qodobbada dacwada, ka feker waxa aad u gudbineyso caddeyn ahaan. Xarriijin in aad u kala qeybiso bogga aad wax ku qoreyso ayaa kuu fiican. Dhanka bidixda ah, ku qoro xaqiiqo kasta oo taageereysa kiiskaaga. Dhinaca midigta ah, ku qoro liiska caddeynta aad u haysato xaqiiqa kasta. Isticmaal qoraalkaaga labada dhinac markaad gudbineyso caddeyn, oo liis ku diyaarso su'aalaha markhaati kasta. Qodobbada dacwada waa in aad adiga oo qura isticmaasho. Wax koobbi ah kama siin kartid garsoorka ama dhinacyada kale ee dacwada.

Maxkamdeynta waxa loo muddeynayaa wakhti go'an. Haddii uusan Amarka Jadwalka kuu sheegeyn wakhtiga dacwada qaadaneyso, la xiriir maamulka maxkamadda si aad u sii ogaato

wakhtiga loo qorsheeyay maxkamdeynta. Ogaanshaha muddada aad u haysato waxay kugu caawineysaa in aad adiguna isu diyaariso. Waa in aad sii habeysato oo aad ogaato inta uu kugu qaadanayo markhaati kasta iyo mowduuc kasta.

## Maxkamdeynta

Wakhtiyada maxkamadeynta, wax kasta waxay kuugu dhici doonaan si habeysan:

- Hordhaca furitaanka
- Arrinta ugu weyn ee dacwoodaha (markhaatiyada iyo bandhigga caddeymaha)
- Arrinta ugu weyn ee dacweysanaha (markhaatiyada iyo bandhigga caddeymaha)
- Doodaha kama-dambeysta ah (oo sidoo kale la yiraahdo hadallada gabagabada)

Ha ka daahin maxkamadda ee hubso in ballanku yahay mid aad xaadireyso ama fogaan-arag. Haddii aad toos u xaadireyso, ku talagal wakhtiga haddii ay dhacdo inay jidadka baabuurta ciriir noqdaan ama ay cimiladu xumaato, iyo baarkinka iyo baarista marka la gelayo maxkamadda. Haddii ballantu tahay mid fogaan-arag ah, kol hore iska sii hubso siday u shaqeynayaan qalabka aad isticmaaleyso iyo in aad haysato wakhti badan si aad u gasho. Haddii aad maxkamadda uga soo qeybgali weydo (si shakhsi ah ama hab fogaan-arag ah) marka karraanigu u yeero kiiska, waxa laga yaabaa in laguu tixgeliyo qof laga guuleystay "laga gar helay" oo garsoorkuna waxay si buuxda u oggolaan karaan codsiyada dhinaca kale. Haddii ay kugu dhacdo xaalad degdeg ah ama aad daahdo, taleefan u dir maxkamadda, oo u sheeg Xataa adiga oo taleefan soo diray, ayey maxkamaddu qaban kartaa dacwad-dhageysiga adiga oo aan joogin, oo sidaas ayaa si khalad ah lagaaga guuleysan karaa.

Isu diyaari in ay maxkamaddu qaadan karto wakhti ka badan intii la filaayey. Haddi aad maxkamadda toos u imaaneyso, ka feker in aad u soo qaadato bas ama aad hesho baarkin wakhti badan intii aad ka welweli lahayd baarkinka jidka ama mid wakhti xadidan. Sii diyaarso in laguu hayo ilmaha oo shaqadana u sheeg inaad soo daahi karto, haddii ay dhacdo. Waxaa iska dhici kara xaalado aan la fileyn ama degdeg ah oo ay tahay in wax looga qabto dhinaca garsoorka. Taas macnaheedu waa in maxkamadda dib loo dhigi karo ama la joojin karo.

**Habdhaqanka maxkamada, oo ay ku jirto Dacwad-dhageysiga Fogaan-aragga**

Uma baahnid in aad dhar cusub u soo iibsato maxkamada, laakiin xusuusnow inay tahay meel rasmi ah oo aad rabto inaad ilaaliso oo aad ixtiraamto labiska iyo dhaqanka. Carruur ha keenin ilaa uu garsoorku kuu sheego in aad carruurtaada keento maxkamadda.

Dabeecadaha habdhaqanka xun looma oggola maxkamadda gudaheeda (marka toos loo yimaado ama fogaan-arag ahaan) sababta oo ah waa buuq, mashquulin, ama ixtiraam darro. Waa in aadan afka ku haysan xanjo, waxba cunin, seexan, dhegeysan qalab taleefan oo dhegaha la gashado, oo ha isticmaalin taleefanka gacanta (oo codka ha ka xirnaado taleefanku), ha soo qaadan hub, ama ha isticmaalin kaamarad, sida kaamaradaha taleefanka gacanta (haddii aan laguu oggolaan). Maxkamadaha qaarkood ma oggola in taleefan lala soo galo, xataa haddii ay dansan yihiin.

Inta maxkamaddu socoto, waa inaad si taxadar leh u dhegeysato garsoorka iyo dhinacyada kale. Fasax weydiiso Garsoorka markaad rabto inaad hadasho. Waa in aad si toos ah ula hadasho Garsoorka, oo waa inaadan toos ula hadlin dhinaca kale. Markaad la hadleyso garsoorka, ku billow inaad tiraahdo, "Garsooraha Sharafta leh." Si fiican oo la maqli karo u hadal oo xusuusnow inuu markiiba hadli karo hal qof keliya. Weriyaha maxkamadda ayaa qoraya wax kasta oo la sheego inta ay socoto maxkamadeyntu, oo waxa la qori karo oo keliya markiiba waa hal qof oo hadlaya. Marna ha la doodin ama ha carqaladeyn qof kale ee isku day in aad xakameyso shucuurtaada.

**Hordhaca Furitaanka**

Hordhaca furitaanka waa qeybta ugu horreysa ee maxkamadeynta. Hordhaca furitaanka markaad sheegeyso, si kooban u guudmar waxa kiisku ku saabsan yahay, natiijada aad coddsaneyso, iyo caddeymaha aad soo bandhigi doonto ee kiiska la xiriira. Caddeynta waxay ka kooban tahay maragfurka iyo bandhigyada caddeymaha garsoorku haysto.

Hordhaca furitaanka ma aha maragfurkaaga. Maragfurka waxaa la dhageysanayaa mar dambe, marka la is dhaariyo. Hordhaca furitaanka ma aha wakhtiga aad soo jeedineyso doodahaaga. Wakhtigaasi waa marka dambe ee doodda xiritaanka (ama wakhtiga doodda kama-dambeysta). Xaaladaha qaarkood, garsoorku waxay dhinacyada u diidi karaan hadalka furitaanka ah, gaar ahaan haddii kiisku fudud yahay oo uu wakhtiga loo hayo maxkamadeynta yar yahay.

**Arrinta-ugu-Weyn Codsadaha iyo Jawaabaha**

Hordhaca furitaanka ah ka dib, codsadaha waa inuu soo bandhigo caddeymo. Hawshaas ayaa la yiraahdaa arrinta-ugu-weyn codsadaha. Marka uu dacwooduhu dhammeysto markhaatiyaasha iyo caddeymaha, waa marka uu dacweysanuhu markiisa soo bandhigayo arrinta-ugu-weyn.

Arrinta-ugu-weyn waxay ka koobnaan kartaa oo keliya maragfurkaaga dhaarta ka dib, ama waxa ku jiri kara maragfurka markhaatiyada kale. Haddii aad haysato markhaatiyo badan, ugu sii

sheeg garsoorka koowaad, labaad, saddexaad, iyo wixii la mid ah. Garsoorku ayaa laga yaabaa inuu ku weydiiyo inaad soo koobto waxa uu markhaati kasta oran doono ka hor inta aan markhaatiga loo yeerin. Isu diyaari inaad dhowr jumladood ku sharxi karto sida uu maragfurka markhaati kasta kiiskaaga muhiim ugu yahay.

**Weydiinta Su'aalaha**

Markaad u yeerato markhaati oo aad ka rabto maragfurid, waa in aad waydiiso su'aalo. Sidaas ayaa la yiraahdaa "weydiinta su'aalaha." Waxaa kuu fiican in aad diyaarsato liis su'aalo ah oo aad tixraaci karto markaad sameyneyso weydiinta su'aalaha tooska ah ee markhaati kasta oo aad keensato. Waxaad markhaatiyada ugu sheegi kartaa maxkamadda horteeda waxa aad weydiineyso si ay u diyaar garoobaan markhaatiyadaada.

Inta lagu jiro su'aalaha tooska ah, waa in aad markiiba weydiiso hal su'aal. Waxaa ku adkaan kara markhaatiga in uu ka jawaabo su'aalaha adag ama hadal ahaan isugu qasan (in su'aalo badan isku mar la weydiiyo). Sidoo kale, maskaxda ku hay in aadan adigu maragfuri karin markaad markhaatiga weydiineyso su'aalaha; waxa keliya oo aad maragfuri kartaa haddii/marka aad markhaati oo kale meel soo istaagto oo lagu dhaariyo. Inta badan, wax kasta lama wada ogaan karo ilaa ay marag furaan dhowr markhaati. Garsoorka ayaa laga yaabaa in uu sameeyo qoraallo uu ku xasuusanayo maragfurka markhaati kasta, oo dooddaada ugu dambeysa, waa inaad faahfaahiso sida cadeymuhu isu waafaqayaan.

Mararka qaarkood markhaati ayaa kaa hor imaanaya oo aan u jawaabeyn sida aad ka fileyso. Waxba ha ku raacin markhaatiga. Weydii su'aalaha oo keliya.

**Su'aalaha Dhinaca Kale**

Marka aad dhammeyso weydiinta su'aalaha (weydiinta tooska ah) ee markhaatiyada, waa in aad u sheegto garsoorka. Dhinaca kale (ama qareen haddii ay wataan) ayaa markaas markhaatiga su'aalo weydiin doona. Sidaas ayaa la yiraahdaa "su'aalaha dhinaca kale." Su'aalaha la weydiiyo ee wakhtiga dhinaca kale waa in ay la xiriiraan maragfurka uu markhaatigu markaas ku sheegay weydiimihii su'aalaha tooska ahaa. Su'aalaha dhinaca kale waxaa loo isticmaalayaa in lagu caddeeyo maragfurka markhaatiga oo waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa in lagu wiiqo ama sumcadda looga dilo maragfurka. Tusaale ahaan, haddii markhaati, qiimeeye, uu ka marag furo qiimaha suuqa ee caadiga ah ee guriga qoyska, waxaad weydiin kartaa su'aalo ku saabsan guryaha uu qiimeeyuhu u isticmaalayo si uu isugu barbardhigo qiimaha suuqa ee caadiga ah.

Su'aalaha dhinaca kale ee markhaatiga waa ay adkaan karaan. Dadka aan qareenka ahayn inta badan waxay dhib kala kulmaan in ay su'aalo weydiiyaan markhaatiga intii ay sameyn lahaayeen hadalkooda ama doodahooda. Sida su'aalaha tooska ah, maragfur ma sameyn kartid markaad su'aalo weydiinayso markhaatiga. Waxa keliya oo aad su'aalo weydiin kartaa markhaatiga. Garsoorka ayaa ku siin kara fursad kale oo aad ku saxdo ama ku oran kara "waxaad maragfur sameyn kartaa marka aad taagan tahay goobta markhaatiga" ee aad dhammeysato su'aalaha.

**Su'aalo-weydiin Kale (ama Rogaalcelis)**

Ka dib marka ay dhinaca kale dhammeystaan weydiimaha su'aalaha markhaatiga, waxaad markhaatiga weydiin kartaa su'aalo badan oo la yiraahdo "su'aalo-weydiin kale" ama "rogaalcelis," laakiin su'aalahaasi waa in ay la xiriiraan wixii looga hadlay su'aalaha dhinaca kale. Ha dareemin in aad ku khasban tahay in aad sameyso su'aalo-weydiin kale. Waxaad oran kartaa ma haysto su'aalo kale.

**Markaad ka Maragfureyso Kiiskaad Wadato**

Haddii aad kiiskaaga uga marag fureyso markhaati ahaan, waa in lagu dhaariyo. Ka dib marka lagu dhaariyo, Garsoorku ayaa kuu oggolaanaya in aad u maragfurto qaab sheeko ah (adigoo xaqiiqada kiiska u sheegaya sheeko ahaan). Markaad dhammeysato maragfurkaaga, dhinaca kale (ama qareen haddii ay wataan) ayaa ku weydiin doona su'aalo ah weydiimaha dhinacooda. Garsoorka ayaa sidoo kale laga yaabaa inuu su'aalo ku weydiiyo.

**Soo-bandhigidda Caddeynta**

Maragfurka waxaa sii dheer, waxa laga yaabaa in aad haysato waraaqo ama wax kale oo aad rabto in aad u isticmaasho caddeyn ahaan. Waraaqaha laga yaabo in aad u soo gudbisay maxkamadda caddeyn uma ahan maxkamadeynta. Haddii aad rabto in ay maxkamaddu wax u isticmaasho caddeyn ahaan, ku qoro Liiskaaga Bandhigyda oo maxkamadda ugu gudbi caddeyn ahaan.

Si aad bandhigyada ugu dhigato caddeyn ahaan, waxaad inta badan u baahan tahay markhaati u kala sheegi kara maxkamadda bandhigyada. Tusaale ahaan, haddii aad haysato sawirro, qofka sawirrada qaaday waa in uu ka marag furo, haddii ay suurtoobeyso, si uu qofkaasi u sharxo goorta iyo goobta uu sawirrada ku qaaday. Waxaad noqon kartaa markhaati haddii aad aqoon fiican u leedahay waxa la soo bandhigayo.

**Diidmo**

Diidmada waa waxaan la yeeleyn. Caadi ahaan, diidmada waxaa laga sameeyaa sabab ah inay dhinac aaminsan yihiin in caddeynta aan la aqbali karin sida uu qabo Xeerarka Caddeynta ee MN. Adiga (iyo kooxda kale) waxaad diidi kartaan su'aalaha, maragfurka, ama bandhigyada aad aaminsan tihiin in aysan u hoggaansamin xeerarka caddeynta iyo habraaca. Haddii aad rabto in aad wax diiddo, waa inaad garsoorka si la maqli karo ugu tiraahdo, "Diidmo". Garsoorka ayaa ku weydiin doona in aad sheegto sababta aad u diidday, oo ka dibna dhinaca kale ayaa ka jawaabi doona. Haddii labada dhinac midkood wax diido, dhammaan su'aalaha waa in isla markiiba la joojiyo (haddii uu markhaati sameynayo maragfurka, markhaatigu waa in uu markiiba joojiyo hadalka). Waa in aad haysato sabab sax ah oo aad wax ku diiddeyso, sida ay qabaan Xeerarka Caddeynta ee MN. "Qofkaan been ayuu sheegayaa" ma aha diidmo sax ah.

- Haddii garsoorku **ayido** diidmada, markhaatigu kama hadli karo wax kasta oo markaas la diiday.
- Haddii garsoorku **yeelo** diidmada, markhaatigu wuxuu ka sii hadli karaa wax kasta oo markaas laga diiday.
- Haddii aad fahmi weydo xukunka garsoorka ee diidmada, weydiiso in laguu sharxo.

Haddii aad haysato caddeymo muhiim ah oo ka soo horjeeda dhinaca kale, garsoorka ayaa go'aamin doona haddii caddeynta la aqbali karo oo waa in lagu daro diiwaanka maxkamadeynta. Haddii garsoorku adiga kaa xukumo, waxaad fursad u haystaa in aad adigu saxdo dhibaatada. Tusaale ahaan, haddii diidmadu ay salka ku hayso "aasaas la'aanta" waraaqo, waxaad awoodi kartaa in aad weydiiso su'aalaha markhaatiga si aad u faahfaahiso waxa ay waraaquhu yihiin oo waa in aad tusto in ay sax yihiin oo waraaqaha loo oggolaado caddeyn ahaan. Ha filan in garsoorku kuu sheego waxaad sameyneyso ama oraneyso oo dhibaatada ku saxeyso. Waxaa shaqadaada ah inaad sameyso doodo sharci ah, garsoorkuna shaqadiisu waa in uu go'aan (xukunka) gaaro. Waa in aad barato Xeerarka Caddeymaha ee MN maxkamadda ka hor oo talo u raadso qareen haddii aadan hubin sida caddeynta muhiimka loogu daro diiwaanka.

**Doodaha Kama-dambeysta (oo sidoo kale la yiraahdo Hadalka Gabagabada ama Doodda Gabagabada)**

Ka dib marka caddeymaha oo dhan la bixiyo, adiga iyo kooxda kale waxaa la oggolaan doonaa in aad sameysaan doodaha kama-dambeysta ah. Inta lagu guda jiro doodda kama-dambeysta ah, faahfaahi waxaad ka codsaneyso maxkamaddu inay kuu sameyso, iyo sida ay caddeymaha la soo

bandhigay u taageerayaan codsiyadaada. Haddii aad rabto qeybin ah guri, tusaale ahaan, u sheeg garsoorka qeybta aad guriga rabto, oo soo koob caddeyntaada si aad u muujiso sababta aad xaqa ugu leedahay.

Waxaad ka faalloon kartaa caddeyn kasta oo lagu soo bandhigay maxkamadda (caddeyntaada iyo caddeynta dhinaca kale) oo u sheeg garsoorka waxaad u maleyneyso in ay caddeyntu tahay. Laguuma oggola inaad Garsoorka u sheegto xaqiiqooyin cusub oo ah kiiska inta lagu jiro doodda kama-dambeysta ah, maaddaama ay fursadda caddeynta lagu soo bandhigay ay dhammaatay.

Dhinaca bilaabay kiiska ama keenay mooshinka waxaa saaran culeyska qancinta maxkamadda (oo loo yaqaan "culeyska caddeynta") si codsiyada looga aqbalo. Dhinaca bilaabay kiiska ama keenay mooshinka ayaa xaq u eh in ay bilaabaan hadalka inta ay socdaan doodaha. Garsoorka ayaa xadeyn kara wakhtiga kama-dambeysta doodda.

## Culeyska Caddeynta

Sida kor ku xusan, dhinaca bilaaba kiiska ama mooshinka ayaa laga rabaa culeyska caddeynta. Haddii ay dhinaca kale ama maxkamadda dacwo kugu soo celiyaan iyaga ayaa laga rabaa culayska caddeynta ee codsiyadooda. **Haddi adiga lagaa rabo culeyska caddeynta, adiga ayaa masuul ka ah in aad keento caddeyn aad maxkamadda ku tuseyso in lagaa oggolaado codsiyadaada.** Haddii ay caddeyntu u janjeerto dhinaca kale, ama haddii dheellitirku siman yahay, ma aadan buuxin culeyska caddeynta, oo maxkamaduna kuuma go'aamin doonto waxa aad weydiisatay.

## Go'aanka

Garsoorka ayaa go'aamiya natiijada kiisaska maxkamadda qoyska. Waxay dhageysan doonaan maragfurka inta ay socoto maxkamadeynta oo waxa ay dib u eegi doonaan bandhigyada. Garsoorka ayaa go'aaminaya xaqiiqooyinka la hubiyey, iyo haddii aad xaq u leedahay waxaad rabto.

Waxaa muhiim in aad fahamto waxa dhacaya marka la dhammeeyo maxkamadeynta iyo haddii ay jiraan waxyaabo badan oo aad sameysaneyso. Tusaale ahaan, mararka qaarkood dhinacyadu waxay codsanayaan oggolaansho ah "amarka lagu taliyey" ka dib markay u dhammaato, ama garsoorka ayaa codsan kara doodda oo qoran. Amarka la soo jeediyey waa waraaq ay hal dhinac (ama qareenkoodu) ku qeexayo xaqiiqada kiiska iyo natiijada la rabo iyo isku dayidda lagu qancinayo garsoorka in sharcigu taageerayo natiijada ay dhinacaasi codsadeen. Garsoorka ayaa go'aamin doona haddii ay rabaan in la soo gudbiyo amarrada lagu taliyey oo

haddii ay sidaas sax tahay, goorta la iska rabo. Amarka lagu taliyey kuma jiri karaan wax caddeyn ah oo aan la aqbalin xilligii maxkamadeynta.

Ka dib markay maxkamaddu dhammaato, iyo ka dib waraaqaha kale (haddii garsoorku codsado) waa la gudbinayaa, garsoorku waxay haystaan 90 maalmood oo ay ku soo qorayaan go'aanka oo qoraal ah (amarka ama xukunka iyo wareegtada). Markaad hesho go'aanka qoran, waxaa aad muhiim kuugu ah in aad si fiican u akhrisato. Waxaa jiri kara macluumaad wakhtigiisu muddeysan yahay, oo waxaa muhiim ah in la fahmo waxay waajibaadku yihiin, haddii ay ku dhex jiraan, go'aanka qoran.